




Hagaha Aqris Fudud ee Buuxinta Foomka Codsiga Taageerada Guriyenta Bulshada

April 2022






Maxuu habraacan ku saabsan yahay?

Habraaca waxa uu kaa caawin doona buuxinta codsigan aad u gudbineyso maamulka deegaanka ee taagerada guriyenta bulshada.

Waxaad u baahan kartaa qof aad aaminsan tahay in uu ku taagero si aad u buuxiso codsigan.



Codsiga taagerada guriyenta bulshada waxaa ku jiro warbixin badan iyo dukumiintiyo.

Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga taagerada guriyenta bulshada maamulka deegaanka aad ku nooshahay.

Yaa heli karo taagerada guriyenta bulshada?



Waxaad heli kartaa taagerada guriyenta bulshada haddii aadan heysanin lacag kugu filan aad iskaga dhiibto goob aad adiga ku nolaato.

Halkee ayaad ka heli kartaa taagerada guriyenta bulshada?

Waxaad ka heli kartaa taagerada guriyenta bulshada maamulka deegaanka (magaalada ama guurtida gobolka) ama hayad kale oo la yiraahdo Hayada Guriyenta La Ansaxiye (Approved Housing Body).



Hayada Guriyenta La Ansaxiye waa hayad siinta guriyen

kooxo dad ah, tusaale ahaan, bulshada Cluid iyo Simon.

Adeega cuuryanimada aad qaadato ayaa laga yaaba in yahay Hayada Guriyenta La Ansaxiye.

Qeybaha Kala Duwan ee Taagerada Guriyenta Bulshada



Qaar kamida qeybaha taageero ee aad ka heli karto meemulka degaanka hoos:

Waxaad ijaaraan kartaa guryo ama abaartiyaal maamulka deegaanka ama Hayada Guriyenta La Ansaxiye.



Gurigaaga kirada ah ama abaartimentiga sida Qorshaha Guriyaha Kirada ah (Rental Accommodation Scheme - RAS) iyo Qorshaha Gaalmada Lacag ee Guriyaha (Housing Assistance Payment Scheme - HAP)

Dadka waaweyn, dadka guri la'aanta ah, dadka safarka, iyo dadka cuuryamiinta ah ayaa lagu caawin karaa guriyen.



Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomka codsiga waxaad lasoo xiriiri kartaa Qeybta Guriyenta ee maamulka degaankaaga ama Xarunta Warbixinta Muwaadinka.



Qof aad ku kalsoon tahay ayaa kugu caawin karo in uu foomka kuu sameyo.

Warbixinta muhiimka ah marka aad sameyneso foomka.



Fadlan jawaabahaaga si waadax ah u qor.

Waxaa muhiim ah in aad ka jawaabto dhamaan su'aallaha ku qoran foomka codsiga.

Codsigaagu horay uma socon doono ilaa aad ka buuxiso dhamaan warbixinada aan u baahanahay.

N/A

Waxaad u baahan doonta in aad ku qorto N/A haddii aysan su'aashu adiga ku quseynin.

Hubso in aad saxiixdo meel walbo oo laguugu weydiyo in aad saxiixdo.



Maamulkaaga degaanka ayaa hubin doono in aad raaceyso sharciga xaquuqda GDPR iyo warbixintaada.

Haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan arrintan, weydii maamulkaaga degaanka.



Waxaad u baahan doonta in aad soo raaciso dukumiintiyada kale foomka. Waxaa jiro liis hubsasho oo kaa caawinayo in aad wax walbo xasuusato.

Codsiga horay uma socon doono ilaa aad wax walbo soo dirto.



Maamulka degaanka ayaa sidoo kale laga yaaba in uu ku weydiiyo warbixin dheeriya waqti danbe.

Haddii warbixintaadu isbadasho (tusaale, haddii aad guursato ama guri cusub u guurto), waxaa qasab ah in aad u sheegto maamulka degaankaaga.



Waa muhiim in aad ka warceliso dhamaan warqadaha iyo fariimaha iimeyl ee maamulka degaankaaga.

Haddii aadan ka jawaabin dhamaan warqadaha iyo fariimaha iimeyl ee maamulka deegaanka waxaa laga yaaba in uu kaa saaro liiska sugayaasha. Tan micnaheedu waa in aadan heli doonin taagerada guriyenta bulshada.



Waxaad dooran kartaa qof kuu dhow adiga oo kaa caawiyo in aad ka jawaabto warqadaha iyo fariimaha iimeyl ka imaanaya maamulka deegaanka.

Waxaa loo yaqaan wadaag-kawarceliye (co-correspondent).



Maamulka deegaanka ayaa u sheegi doono wadaag-kawarceliyahaaga in ay kuuso direen warqad ama fariin iimeyl.

Fadlan koobi wax walbo kahor inta aadan u dirin maamulka deegaanka.

Liiska-Hubsashada



Foomka ayaa leh liiska-hubsashada, waxaana ka mida dhamaan warbixinta dheeriya iyo dukumiintiyada ay tahay in aad kusoo darto foomka codsiga.

Waa in aad xasuusato in aad ka jawaabto dhamaan su'aallaha foomka, ama codsigaaga horay uma sii socon doono.

Isku day in aad foomka u dhiibto qof ku sugan xafiiska maamulka deegaanka, waxa uu qofkan kaa fiirin karaa in aad ka jawaabtay dhamaan su'aallaha lagaa rabo in aad ka jawaabto.

Waxa ay sidoo kale kaa caawin karaan in aad hubsato in aad heysato dhamaan dukumiintiyada uu codsigaaga u baahan yahay.

Waxaan qaadan doona misna sharaxi doona warbixinta dheeriga iyo dukumiintiyada aad u baahan tahay xaga hoose:



Warbixinta Shaqsi

- Sawirka ID-ga (baasboor ama leysinka darawalka).
- Shahaadada dhalashada (adiga iyo qof walbo oo kula codsanayo, sida lamaanahaaga).
- Nambarada PPS (adiga iyo qof walbo oo kula codsanayo adiga).
- Cadeynta cinwaan (sida rasiidka korantada)



your electricity bill			
Bord Gáis Energy think beyond			
Mr Sam Sample, Any Street, Any Town, Any County			
Billing period: 01 Oct 09 - 01 Dec 09			
Date of issue: 07 Dec 09			
Account number: 12345678901			
METER NO.	METER READINGS	ELECTRICITY USED	METER READING TYPES
Z000001234	6010 5065	945	At Accountant's Office reading

Warbixinta Daqliga Kusoo Galo

Waxaan u baahanahay warbixin iyo cadeynta dhamaan lacagta dadka codsanayo, sida mushaarka iyo daqliga soo galo.

Shaqeyo

- Haddii adiga (iyo qof kasta oo kula codsanayo) waa in uu shaqo heystay 12 bilood ee lasoo dhaafay, waaan u baahan doona walxahan soo socdo:

Laga Bilaabo Sanadkan

- Rasiidkaga lacag qaadasho ee dhamaan shaqooyinka aad qabatay laga soo bilaabo Janaayo sanadkan.

Ama

- Guud marka Mushaar iyo Canshuur (sannadkan) Waxaad ka heli kartaa tan adeega onleyinka ee Daqliga (revenue) (myAccount). Tani waxaa ku jiro doono dhamaan shaqooyinkaaga sanadkan ilaa hadda.



Employee No.	Employee Name	Process Date	National Insurance Number
0634	FULL NAME HERE	20/01/2005	NP000000B
All Payments		All Deductions	
Unit	Rate	Unit	Rate
Gross Salary	1.00 3750.00	3750.00	
Monthly		PAYE Tax	845.19
Payment Method:		National Insurance	265.82
Cheque			
FULL NAME 38 ANYWHERE COURT KENSINGTON SW9 0DD		Tax Period: 10 Tax Code: 489L	Total Gross Pay TD 37500.00
		Total Gross Pay 3750.00	Gross for Tax TD 37500.00
		Gross for Tax 3750.00	Gross for Tax TD 8451.90
		Earnings for NI 2730.00	Earnings for NI TD 27300.00
			National Insurance TD 2656.20
COMPANY NAME		Net Pay	2639.19

Revenue



Sanadkii Tagay

- Warbixinta Masuuliyad (statement of liability)
Waxaad weydiin kartaa Revenue sida adeega onleyinka ah (myAccount) ama xafiiskaaga canshuurta ee deegaanka.

Warbixinta Masuuliyad (statement liability) ayaa ah qiimeynta ugu danbeyso ee masuuliyada canshuur ee canshuurta sanad. Waxaa horay loogu yaqaane P21 - Warbixinta Dhamaadka Sanadka.

Iyo

- Guudmarka Warbixinta Shaqaalleyn
Waxaad ka heli kartaa adeega onleyinka ee Daqliga (revenue).
(myAccount).

Warbixinta Daqliga Kusoo Galo (sii socdo)



Daqliga Xanaanada Bulshada (ceyr)

- Haddii adiga (iyo qof walbo oo kula codsanayo) aad qaadata lacagaha ceyr, waxaad u baahan doonta in aad soo dirt warbixin iyo cadeyntan. Waxaad warbixin ka heli kartaa Waaxda Ilaalinta Bulshada.

- Warbixintan ayaa muujin doonto lacagta aad ka hesho.



Kaligii Shaqeyste

- Haddii aad tahay qof iskiis u shaqeyso, ugu yaraan waxaad u baahan tahay 2 sanno riboorka hanti dhowre ee ciwaankaaga iyo ogeysiiska qiimeyn iyo / ama warqada garashada qiimeynta-nafsi (ee 12 bilood u danbeye).

Benshaniska

- Haddii aad tahay xubin kamida qorshaha benshanka adeega shacabka, ama waxa loo yaqaan Additional Superannuation Contribution (ASC), kadib waxaad u baahan doonta in aad keento
 - rasiidkaaga ugu danbeye ee lacagta laguugusiye ee sanadki hore, iyo
 - rasiidki ugu danbeye ee sanadkan

0634	FULL NAME HERE		2010/2005	NP0000008
Employer	Rate	Amount	Employer	Amount
Gross Salary	1.00	3750.00	PAYE Tax	845.19
Monthly			National Insurance	265.82
Payment Method:				
Cheque				
FULL NAME 35 ANYWHERE COURT KENSINGTON SW3 0DD		Tax Period: 10 Total Gross Pay Gross for Tax Earnings for NI	Tax Code: 489L 3750.00 3750.00 2730.00	Total Gross Pay TD Gross for Tax TD Tax Paid TD Earnings for NI TD National Insurance TD
COMPANY NAME				Net Pay 2639.19

Warbixinta Dheeriga ee lagaa rabi karo adiga (haddii ay adiga ku quseynin, waxaad ku qori kartaa N/A)



- Warbixinta iyo cadeynta muwaadinimo ama fasax aad ku joogto Ireland adiga iyo qof walbo oo kula codsanayo.



(sida warqad kasocoto Waaxda Cadaallada).

- Shahaadada Guurka

- koobiga kala fogaansho / heshiiska furiin.

- Warbixinta iyo cadeynta heshiiska kiro iyo diwaan gelinta Guddiga Kirada Deegaan (Residential Tenancy Board) haddii aad hadda ijaaraneyso hadda.

- Warbixin ku saabsan hanti walbo ama dhulkaaga (ama qof walbo oo kula codsanayo adiga) leedahay. Warbixintan waa in lagusoo daro goobta, qiimaha, xaalada hantida iyo waxii lacag aad adiga ka hesho.



- Haddii aad leedahay guri iyo dhibaato moorgeyj, waxaad u baahan tahay warqad kaalmada deynta guriga ee deyn bixiyaha.
- Warqad katimid maamulka deegaanka ama Hayada Guriyenta La Ansaxiye ee aad horay ugu noleyd haddii aad heli jirtay taagerada guriyenta bulshada kahor.
- Warbixinta iyo cadeynta xiriirka kala dhaxeyo deegaanka haddii aadan hadda ku noleyn, tusaale, tani waxa ay noqon kartaa cadeyn in aad ku noolan jirtay.
- Foomka Warbixinta Caafimaadka iyo/ama Cuuryanimada dhameystiran.
Tani waxaad ka heli kartaa maamulkaaga deegaanka. Tani waa warbixin dheeriya ee foomkan ee bogga 18.
- Warbixinta Dhaqtar Daaweyn Terabi ee wax yaabaha aad u baahan aad u baahan tahay gurigaaga sida qalabka ama isbadalka guriga si adiga laguugu fududeyo isticmaalkiisa.

Foomkan waa 12 qeybood Habraacan waxa uu quseya Qeybahan



Qeybta 1: Adiga Kugu Saabsan (Xogtaada Shaqsi)

- Qeybtani waxa ay ku wediineysa waxyaabaha sida magaca, taariikhda dhalashadda, ciwaanka hadda dagan tahay.
- Haddii uu jiro qof kale oo kula codsanayo guriyenta bulshada (sida lamaanahaaga), sidoo kale waxa ay u baahan doonaan in aad buuxiso warbixintooda shaqsi.



Qeybta 2: Halkee Kasoo Jeeda (Xogta Dhalashadaada)

- Qeybtan waxa ay ku weydiineysa halka aad ku dhalatay, luuqada ku hadasho, xaalada dhalashadaada tusaale, haddii aad Irish tahay.

Qeybta 3: Halkee Ka Shaqeysa (Xogta Shaqadaada)

- Qeybtan waxa ay ku weydiineysa haddii aad shaqeyneso.
- Waxa ay ku weydiineysa xogta shaqaaleysiiyahaaga, sida magaca shirkada iyo ciwaankeeda.



Qeybta 4 Lacagta Kusoo Gasho (Xogta Daqliga Kuso Galo)

Employee No.	Employee Name	Employee Date	National Insurance Number																									
0834	FULL NAME HERE	20/01/2005	NP00000008																									
Payments <table border="1"> <thead> <tr> <th></th> <th>Date</th> <th>Rate</th> <th>Amount</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>Gross Salary</td> <td>1.00</td> <td>3750.00</td> <td>3750.00</td> </tr> <tr> <td>Monthly</td> <td></td> <td></td> <td></td> </tr> <tr> <td>Payment Method:</td> <td></td> <td></td> <td></td> </tr> <tr> <td>Cheque</td> <td></td> <td></td> <td></td> </tr> </tbody> </table>			Date	Rate	Amount	Gross Salary	1.00	3750.00	3750.00	Monthly				Payment Method:				Cheque				Deductions <table border="1"> <thead> <tr> <th></th> <th>Amount</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>PAYE Tax</td> <td>845.19</td> </tr> <tr> <td>National Insurance</td> <td>259.82</td> </tr> </tbody> </table>		Amount	PAYE Tax	845.19	National Insurance	259.82
	Date	Rate	Amount																									
Gross Salary	1.00	3750.00	3750.00																									
Monthly																												
Payment Method:																												
Cheque																												
	Amount																											
PAYE Tax	845.19																											
National Insurance	259.82																											
FULL NAME 35 ANYWHERE COURT KENSINGTON SW3 0DD		Pay Period Tax Period: 10 Tax Code: 489L Total Gross Pay 3750.00 Gross for Tax 3750.00 Earnings for NI 2750.00	Pay to Date Total Gross Pay TD 3750.00 Gross for Tax TD 3750.00 Tax Paid TD 845.19 Earnings for NI TD 2750.00 National Insurance TD 259.82																									
COMPANY NAME		Net Pay 2639.19																										

- Waxaad u baahan tahay in aad muujiso daqligaaga isbuucle ama mushaarkaaga kahor inta aadan bixin canshuurta (wadarta guud lacagta). Tani waxa ay noqon kartaa lacagta aad shaqada ka hesho, lacagta ceyrta, ama lacag kale aad hesho.
- Marka waxaad u baahan tahay in aad liis gareyso waxa lacagtaada laga jaro (laga bixiyo), tani waxa ay noqon kartaa sida PAYE, PRSI.

Qeybta 5 Dadka Kale ee Kula Codsanaya (Xubnaha Kale Guriga Kugula Nool)



- Qeybtani waxa ay ku weydiineysa warbixinta ku saabsan dadka kale ee ku nolaan doono isla guriga adiga. Tusaale, lamaanahaaga ama waxii caruur aad leedahay.
- Waxaa lagaa rabaa in aad bixiso xogta magacyadooda, taariikhda dhalasho, wadanka dhalasho, xaalada dhalasho, jinsiga, xaalada guur.

Qeybta 6 Halka aad Hadda Ku Nooshahay (Halka Hadda Degan Tahay)



- Qeybtan waxa ay kuweydiineysa halka aad hadda ku nooshahay iyo xoogtan ku saabsan.
- Waxa ay ku weydiineysa haddii aad leedahay ama kireysate guriga ku nooshahay iyo guri nuuca uu yahay.
- Haddii aad kiro ugu jirto, waxaad u baahan tahay in aad xogtiisa iyo cadeyntan sheegto.
- Waxa ay ku weydiineysa sababta aad taagerada u rabto (sida sababaha cuuryanimu).
- Waxaa markaa u baahan tahay in aad sharaxdo waxa ka jira gurigan aad hadda dagan tahay.



Qeybta 7: Halka Horay Ugu Noled (Goobaha Kusoo Noleyd)

- Qeybta waxa ay ku wediineysa inaad sheegto xogta meelaha aad kusoo noleyd shanti sanno ee ugu danbeysay.

Qeybta 8: Guri Nuuce Ayaad u Baahan Tahay (Shuruudaha Guriga Uga Baahan Tahay)



- Qeybta ayaa ku weydiineyso haddii aad sheeganeyso safre Irish ah.

Tani waxaa lagu ogaanaya haddii aad tahay qof safar ah oo jecel in lagu daro Mashruucyada Hoyga ee Safarleyda.




Tani waxa ay siineysa maamulka deegaanka warbixinta ay u baahan yihiin si loo hurumariyo Mashruucyadooda Hoyga ee Safarleyda (Traveller Accommodation Programmes).

Warbixintan ma sameyn doonto haddii uu qof u qalmo taagerada guriyenta bulshada.



- Qeybtan waxa ay ku weydiineysa nuuca taagero guri aad u baahan tahay si gurigaaga uu u noqdo mid isticmaalkisu fudud yahay. Tusaale, badalida musqusha, qolka jiifka ama sameynta dalcad.



- Haddii aad ku codsaneyso caafimaad ama cuuryanimo, waxaa lagu weydiin doona in aad sheegto xogta baahidaada.
- Haddii aad ku codsaneyso caafimaad ama cuuryanimo, waxaad u baahan doonta foom kale, cuuryanimada iyo/ama foomka Xogta Caafimaad.

Tani waxaad ka heli kartaa maamulkaaga deegaanka. Tani waa warbixin dheeriya ee foomkan ee bogga 18.

Qeybta 9: Aassaaska Codsiga



- Waxaad kaliya ka codsan kartaa taagerada guryenta hal maamul deegaan.




- Magaca maamulka deegaanka aad rabto in aad ku noolato ayaa ka muuqan doono bogga hore ee codsiga.

- Maamulka degamadan waa in uu ku yaala goobta aad sida caadiga ah ku nooshahay.



- Waxaa lagu weydiin doona in aad doorato halka aad jeceshahay in aad ku nolaato maamulka deegaankan.



- Si taxadar leh u dooro goobahan, ka fikir walxaha sida adeegyada, gaadiidka, xiriirada qoyska iyo asxaabta, iyo nuucyada guryaha ee aad deegaankan ka dooraneyso.
 - Waxaad ka codsan kartaa goob kale haddii qof kale ee guriga ku nool deegaankaas xiriir la leeyahay.
 - Xiriir deegaan waa marka uu qof:
 - halkaas ku noolaa muddo 5 sanno ah,
 - uu ka shaqeyo deegaan 15km oo goobtas ah,
 - iskuul ama kuleej halkaas ka dhigto,
 - uuga baahan yahay waxbarasho ama adeeg caafimaad goobtaas,
 - ku leeyahay qaraabo ku nool goobta mudo ka badan 2 sanno. qaraabo waxaa kamida waalid, cunugaaga weyn, ama walaal.
- Waxaa sidoo kale ku jiri karo qaraabo kale oo xiriir dhaw la leh xubin guriga kamida.

Qeybta 10: Guryaha Kale ee aad Leedahay (Xogta Guryaha Kale)



- Qeybtani waxa ay ku weydiineysa waxii ku saabsan haddii uu jiro guri ama dhul aad adiga leedahay.

- Waxa ay ku wediineysa waxii guri ah ama dhul ah uu leeyahay qofka adiga kula codsanayo uu leeyahay.

N/A

- Ku qor n/a bokiska haddii su'aallahan aysan adiga ku quseynin.



Qeybta 11: Gafafka Amarka Shacabka iyo Warbixinada Kale

- Qeybtani waxa ay ku weydiineysa haddii aad waligaa wax gaf ah ka gashay Gardai.

Qeybta 12: Warbixin Kale

- Ku dar wax kaste oo kale oo muhiim ah ama caawin karo taagerada codsigaaga.



Ku Dhawaaqis



Dhamaadka foomka codsiga waxaa ku jiro qeyb lagaa rabo in aad adiga saxiixdo oo lagu magacaabo 'Sheegida Qirasho'.



Aqrinta sheegashada qirasho iyo saxiixida. Haddii uu jiro qof kale oo kula codsanayo, ayagana sidoo kale waa in uu saxiixo.



Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomka codsiga waxaad lasoo xiriiri kartaa Qeybta Guriyenta ee maamulka degaankaaga ama Xarunta Warbixinta Muwaadinka waa ay ku caawin doonan. Qof aad ku kalsoon tahay ayaa sidoo kale ku caawin karo adiga.

Cuuryanimada / Foomka Warbixinta Daawada

Foomkan Maxuu ku Saabsan Yahay?



Haddii aad codsaneyso taagerada guriyenta bulshada sababtoo ah waxaad tahay cuuryaan, waxaad u baahan tahay in aad buuxiso foom kale.

Foomkan waxaa loo yaqaan HMD - Foom 1. Waxaad weydiin kartaa maamulka deegaanka in uu ku siiyo foomkan.


Warbixin Muhiima

Waxaa laga yaaba in aad hesho mudnaan taagerida guriyenta haddii aad tahay qof cuuryaan ah ama xaalad caafimaad qabo.

Tani waxa ay ku xirnaan doonta xaaladaada guriyenta.

Foomka waxa uu lahaan doona afar qeyb. Waa in aad buuxiso qeybta 1 iyo qeybta 2 adiga shaqsiyan.

Labo xirfadle caafimaad waa in ay kuu buuxiyaan qeybta 3 iyo qeybta 4.





Xirfadle xanaanada caafimaad waxaa kamida shaqooyinkan soo socda: La-talliye, Dhaqtarka Guud (GP), Kalkaalisada Caafimaadka Maskax, Kalkaalisada Caafimaadka Shacabka, Daaweyaha Terabi ama Shaqaallaha Bulshada.

Waxaa laga yaaba in aad u baahato warbixinta Daweyaha Terabiga (OT) ayada oo ay ku xiran tahay baahida guri, sida haddii aad u baahan tahay in aad wax kabadasho guriga iyo in aad fududeyso isticmaalkiisa.

Foomkan Waa Qeybta 4 Habraacana waxa uu quseya

Qeybahan

Qeybta 1: Cuuryanimada iyo / ama Warbixinta Dawada



- Qeybtan ayaa laguugu weydiin doona in aad ku buuxiso warbixinta ku saabsan cuuryanimadaada iyo / ama xaaladaada caafimaad.

Qeybta 2: Adiga Kugu Saabsan (Xogtaada Shaqsi)



- Qeybtan ayaa laguugu weydiin doona in aad ku buuxiso xogta ku saabsan adiga naftaada tusaale: magacaaga iyo waqtigaaga dhalashadda.

Qeybta 3A: Warbixinta Xirfadlaha Caafimaadka



- Labada xirfadle caafimaad ayaa ku buuxin doono xogta lagala soo xiriiri karo qeybtan.
- Waxa ay buuxin doonaan qeyb kamida foomka si aay ugu taageraan codsigaaga.

Qeybta 3B: Xogta Goobta aad Hadda Dagan Tahay



- Qeybtan waxaa lagu weydiin doona xirfadlayaasha caafimaad goobta aad ku nooshahay haddii ay saameyn xun kugu leedahay.

Qeybta 3C: Xogta Goobta Dagan Tahay



- Qeybtani waxa ay weydiineysa xirfadlaha caafimaad sida ay sameyn wanaagsan ugu yeelan doonto naftaada haddii la badalo.



Qeybta 3D: U Baahan Taagero

- Qeybtani waxa ay wax ka weydiineysa xirfadlaha caafimaad taageerada aad u baahan tahay si aad iskaa ugu nolaato.

Qeybta 4: Ku Dhawaaqista Qirasho ee Xirfadlaha Caafimaadka



- Labada xirfadle caafimaad ayaa saari doono saxiix iyo taariikh foomka.